

Satelliitti

Hulvelankatu 2, Raisio SOMALI

Ku soo dhawaada xarunta qoysaska ee Satelliitti!

Xarunta qoysaska ee Satelliitti waa barkullan ay ku kulmaan dhammaan qoysaska oo dhami

Satelliitti waxaad ku baran kartaa qoysaska kale waxaadna ka qeybgeli kartaa barnaamiyada lagugu hagayo.

Goobta Kafeega Qoyska

Goobta Kafeega Qoyska ee MLL wuxuu siiyaa waalidka carruurta yar yar goob ay kula kulmi karaan waalidka kale oo ay la wadaagaan khibradooda. Carruurta waxay awood u leedahay in ay xiisayso fursado ay kula ciyaarayaan carruurta kale. Goobta Kafeega Qoyska waa lagu sheekaystaa, koob bun ah baan lagu cabbaa ama shaah, iyo la ciyaarka carruurta. sidoo kale waxay marti geliyaan bandhigyada khabiirada. hawlahaas waxa wada hagayaal mutadawaciin ah.

Goobta Kafeega Qoyska waxay soo dhowaynaysaa dhamaan qoysaska iyo carruurta!

Isniinta – Jimce Qaxweynta qoysaska 9-12

Barkullanka waxaa imaan kara dhammaan qoysaska, kuwaas oo ah kuwa haysta caruuraha ay da'adoodu ka yar tahay 7- da sano. Uma baahna in ay horey isku soo diiwaangeliyaan. Makhaayada waxaad ka iibsan kartaa qaxwe, shaah iyo wax yar oo cunto fudud ah.

Waxqabad isbedbedel ah oo caruurta iyo waalidiintooda loogu talogaley, sida waxyaalaha gacanta laga qabto ee ay caruurta ku falaadaan, jimicsi iyo muusik. Xarunta qoysaska ee Satelliitti waxaad sidoo kale suurtoagal ah in aad ku barbaratid ama ka kordhisatid afka finnishka.



raisio